# Goynta Korontada Kolka Lacagta lagu leeyahay Qolada Guriga

Utility Shut-Offs When Landlord Owes the Bill

## Ogaysiiska Goynta ah

Hadii qolada gurigu aysan bixin kharashka, shirkada korontadu waa ay goyn kartaa adeegyada. Waa khasab inay ku dhajiyaan ogaysiis guriga ama ay boostada kuu soo dhigaan mid kuu sheegaya inay goyn doonaan adeega hadii aan la bixin kharashka.

Waxaa dhici karta inaadan helin ogaysiiska hadii shirkada korontadu ay u malaynayso in qofka guriga lehi uu ciwaankaa ku nool yahay. La xiriir shirkada korontada mar walba oo aad ka hesho biil magaca qofka guriga leh ku qoran. U sheeg in guriga hadda qofka degani uu kireyste yahay. Ogaysiiska goyntu waxa uu leeyahay lambar la waco si loo helo akhbaar dheeraad ah.

## Joojinta Goynta



Mar hore, wac qolada guriga, waydiina in biilka la bixiyo. Hadii ay yiraahdaan waa aanu bixinaynaa waydii goorta. Ka dibna wac shirkada korontada si aad u hubsato in la bixiyey.

Hadii qolada gurigu aysan bixin, waxaa jira 2 qaab oo lagu joojin karo goynta: Falka Maciinka  Degdeg ah Kireystaha ama bixin biilka ah ka dibna aad ka goosato kirada.

### 1. Falka Maciinka Degdeg ah ee Kireystaha

Waxa aad xareysan kartaa dacwo maxkamadeed oo la yiraa Falka Maciinka Kireystaha ee Degdeg ah (ETRA), sidoo kalena waxaa la yiraa Codsiga Gargaarka Degdeg ah ee waafaqsan sharciga Maciinka Kireystaha. Ka hel foomamka shabakada maxkamada (website) www.mncourts.gov. *(ingiriisi kaliya)*

- → Riix "*Get Forms" (Hel Foomamka)*
- → Riix "*Housing/Landlord-Tenant" (Guryaha/Qolada Guryaha -Kireystaha)*
- → Riix "*Emergency Relief" (Gargaar Degdeg ah)*

Maxkamadu waxa ay amri kartaa qolada guriga inay bixiyaan biilka. Hadii ay jiraan wax dhib ah oo ku saabsan waxa guriga ka halaysan, maxkamadu sidoo kale waxa ay amri kartaa qolada gurigu inay hagaajiso. Waxaad kalood ka codsan kartaa maxkamada inay kuu ogolaato inaad adigu biilka sii bixiso ka dibna aad ka goosato kirada. Eeg warqada xogta aruursan ee Hagaajinada Degdeg ah *Dhibaatooyinka Dayactirka ee Degdegga Ah*, si aad wax uga ogaato (ETRAs).

Hadii aadan heli karin amar maxkamadeed ka hor waqtiga goynta, wac shirkada korontada waydiisana inay sii wadaan adeegyada inta aad ka helayso amar maxkamadeed.

## 2. Bixi kana Goosto

Minnesota waxa ay leedahay sharci la yiraa bixi-kana-gooso. Sharcigani waxa uu quseeyaa korontada uun, ee ma quseeyo hagaajinta. Magaalooyinka qaarkood sida, Minneapolis, sidoo kale waxa ay leeyihiin sharciyo u gaar ah oo ah bixi-kana-gooso. Si aad u isticmaasho sharciga Minnesota, mar ugu horeeysa hubi in shirkada korontadu ay ogoshahay inay sii wado adeegyada ilaa iyo biilka kale laga gaarayo hadii aad lacagta bixiso.

U sheeg ama warqad ugu qor qolada guriga 48-saac ka hor waqtiga aad rabto inaad biilka sii bixiso aadna ka goosato kirada. Waa aad siin kartaa ogaysiis mudaddiisu intaa ka yar tahay hadii adeega la gooynayo muddo ka yar 48-saac. Hadii qolada guriga aad afka uga sheegto, waa khasab inaad ugu dirto ogaysiis qoran 24-saac gudahood.

Nuqul kala har ogaysiiska aad dirto. Bixi marka hore biilka ugu dambeeya ee aad hesho. Ka qaado rasiid shirkada korontada. Nuqul uga dir rasiidka qolada guryaha ka dibna ka gooso cadadka lacagta ah ee aad bixisay kiradaada bisha soo socota aad bixinayso.

Shirkada korontadu waxaa dhici karta inay ku siiso hal mar oo kale oo muddo biil bixin ah ka hor inta aysan goyn korontada. Hadii arrintu ay saa tahay qolada guriguna aysan ku bixin mudaddan gudaheeda, waxaa dhici karta inaad u baahan tahay inaad xareysato dacwada la yiraa (ETRA) si kolka aad u hubsato in adeegaaga korontadu uu sii socdo.

## 3. Siinta Lacagta iminka la soo Dalacay Shirkada Korontada

Marka hore isku ay inaad la xiriirto qolada guriga aadna ka codsato inay bixiyaan lacagta korontada. Hadii taasi shaqeyn waydo, la hadal shirkadaha korontada.

**Biyaha:**
Shirkada biyahu waa inay kuu sheegtaa hadii ay biyaha kaa xirayaan. La xiriir shirkada biyaha. Waxaad xaq u leedahay inaad bixiso ***kaliya*** lacagta biyaha ee bisha markaa lagu jiro uuna adeegu kuu sii socdo, ama biyaha laguu soo furo. Mas'uul KAMA tihid inaad dhigto lacag dabaaji ah ama aad bixiso khidmaha la soo daahida lacagta ama khidmado ay qolada gurigu mas'uul ka tahay. Uga dir qolada guriga nuqul rasiidka cadeynaya cadadka aad bixisay, ka dibna waxa aad kala hari kartaa cadadkaa kirada bisha soo socota aad bixinayso.



**Gaaska & Korontada**:
Shirkadaha gaaska iyo korontada waa inay kuu sheegaan hadii ay rabaan inay gooyaan adeega, iyo goorta ay goynayaan. Waa aad la xiriiri kartaa shirkadaha gaaska iyo korontada. Waxaad xaq u leedahay inaad bixiso ***kaliya*** lacagta bisha markaa lagu jiro uuna adeegu kuu sii socdo, lagu soo furo ugu yaraan bil kale. Mas'uul KAMA tihid inaad dhigto lacag dabaaji ah ama aad bixiso khidmaha la soo daahida lacagta ama khidmado ay qolada gurigu mas'uul ka tahay. Uga dir qolada guriga nuqul rasiidka cadeynaya cadadka aad bixisay, ka dibna waxa aad kala hari kartaa cadadkaa kirada bisha soo socota aad bixinayso.

Hadii aad ku nooshahay sar qoys oo ah 1-4 dabaq, waxa aad dooran kartaa inaad adigu la wareego xisaabta magacaagana lagu qoro. Mas'uul KAMA tihid inaad dhigto lacag dabaaji ah

ama aad bixiso khidmaha la soo daahida lacagta ama khidmado ay qolada gurigu mas'uul ka tahay. Uga dir qolada guriga nuqul rasiidka cadeynaya cadadka aad bixisay, ka dibna waxa aad kala hari kartaa cadadkaa kirada bisha soo socota aad bixinayso.

## Kee ayaan ka Doortaa waxyaabaha la i kala dooran siiyey?

Faa'iidada mida "bixi kana jaro" waa waxa aad bixiso waxaa kala hari kartaa kirada, adigoon maxkamad tagin. Laakiin hadii in ka badan hal wax la goynayo, ama hadii ay jiraan dhibaatooyin hagaajin la'aan guriga ah, waxaa inaad xareystaa dacwada (ETRA). Dacwada (ETRA), ah waxaad maxkamada uga codsan kartaa inay amaro qolada guriga inay bixiso **dhamaan** biilalka korontada ah oo dhan iyo inay guriga wixii ka halaysan ay hagaajiso. Dacwada (ETRA), ah hadii qolada gurigu aysan wax ka qaban dhibaatada koronto goynta ah, waxaad kaloo maxkamada ka codsan kartaa inay u magacowdo maamule la wareega maamulka sarta aad guriga ka kireysatay ilaa iyo inta dhibaatooyinka wax laga qabanayo.



Hadii aad si ikhtiyaar ah ugu soo furato gaaska iyo korontadda magacaaga, shirkadda koronto bixiyaha ahi waxa ay ka dhigi mas'uuliyadaadda biilka wixii markaa ka dambeeya. Laakiin, waa xaquuqdaadda inaad bixiso aadna ka jarato hal bil biilkii iyo midda xigta adigoon biilka magacaaga gelinayn.

Haddii shirkadda korontaddu ay kaala mudacdo xuquuqdaadda ku saabsan isticmaalka bixi-kana jar, ka xareyso ashtako Xafiiska Arrimaha Macaamiisha ee (Consumer Affairs Office) ee  Gudoomiyaha Korontadda Dadweynaha [Minnesota Public Utilities Commission (CAO/PUC)]. Waxa aad ka heli kartaa foomka ashtakada barta consumer.puc@sate.mn.us. Ama wac khadka ah (651) 296-0406.

**Ogow:** Haddii shirkad koronto ama gaas ay horey kuugu lahayd wax lacag ah adigoo ku nool qowlad ama guri kale, waa inaad bixiso lacagahaa horey laguu lahaa.

## Hadii qolada guriga aan ku jiri lahi ay guriga gado ama lagala wareego?

Hadii guriga lala wareego ha noqoto gadid ama bangi la wareegide, mulkiilaha cusub ayaa mas'uul ka ah korontada ay qoladii horey guriga u lahaan jirtay la rabay inay bixiso. Ula xiriir qolada cusub degdeg kolka aad ogaato cidda ay yihiin si aad u hubiso in biilka si quman loogu wareegiyey iyaga iyo in korontadaada aan lagaa goyn. Eeg warqadayada xogta aruursan ah ee *Kolka Qolada Guriga Aad uga Jirto lagala Wareego Guriga: La Wareegida Guriga iyo Joojinta Qandaraaska Guri kala Gadashada*, si aad akhbaar dheeraad ah aad uga ogaato xaquuda kireystaha ee guriga lala wareegayo.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**